



LIISKA DAYACTIRKA GURIGA



**TAKE WINTER
BY STORM**

Gurigaagu wuu ka badan yahay maalgalin kaliya: Waa hooygaaga. Sidaa darteed dabcan, waxaad rabtaa inaad daryeesho. Waqti ku qaado inaad diyaariso gurigaaga ka hor inta aan la gaarin cimilada qabaw ee soo socota. Wax kasta u diyaaragaree bilaha qabaw ee soo foolka leh.

- U samee oo raac qorshaha maaraynta ka hortagga cimilada/halista gurigaaga ama hantidaada (sida midka hoose) si aad u yarayso saamaynta duufaanka unga hoggaansan sannad kasta bilawga waqtiga duufaanka.
- Sannad kasta, dib u fiiri caymiska hantidaada si ad u fahamto aadna wax uga qabato baahida caymiska. Waydii caymiska daadka ama caymiska buuxa bullaacadaha/dareerinta duufaanka.

- Si tafatiran u dhammaystir tirada alaabta aad leedahay kuna hay meel ammaan ah oo ka dheer guriga (sida sanduuq lagu keydsado alaabta). Waxaad foomka ka heli kartaa bogga internetka TakeWinterByStorm.org.

Bacdamaa u hoggaansamida jadwalka dayactirka guud ee gurigu uu yahay wax muhiim ah sannadka oo dhan, waxa jira dadaalo dayactir oo cayiman oo ay tahay inaad ku dadaasho si aad u badbaadiso gurigaaga xilliyada bilaha jiilaalka qabaw. Tilmaamahani waxay kaa caawin karaan cimilada waqtiga jiilaalka uga hortagto guri si fiican loo dayactiray.

Saqaafka, Rakada iyo Masharaafka

- Hubi saqaafkaaga in uu leeyahay jilay aan meel haysanin, wax ka maqn, duug ah, ama waxyeelo soo gaadhay oo hubso in maadada biyo celinta sagan tahay agagaarka daloolada iyo tubada qiiqa dibadda u saarto (chimney) si uu u suuliyi khashinka duulduulaya una yareeyo fursadda burburka biyaha.
- Baarwaxyaabaha qabawga ka celiyo rakada iyo hulalka dhulka hoose. Xidh meelaha ifayaasha xoodan, cir-daloolada rakada, iyo daloolada biyo-galinta kuwaasoo oggolaan karaya hawo diirani oo ka timaad meesha diiran ee hoose inay soo gasho rakada.

- Masharaabta waa inay nadiif ahaadaan, si sax ah leysugu toosiyay, si ammaan ahna loogu dhajiyay. Baar masharaabta dhawr jeer xilliyada bilaha dayrta iyo jiilaalka, gaar ahaan hadday jiraan geedo badani gurigaaga.
- Masharaabta iyo tubooyinka soo dajiyaha roobka waa inay ka sii jeedaan aasaaska, sidoo kale waa in ay ka sii jeedaan dariiqyada lugu socdo iyo kuwa baabuurta la dhigto guriga hortiisa, si aan loogu taraarixin una fadhiisanin baraf adag.

Darbiyada Dibadda iyo Tiirinta

- Fiiri saqaafka dibadda wareegga dhismaha, looxa dhinacyada, darbiyada mattooneelada, geesaha, iyo maadada biyo celinta in aysan waxba qabin, in aysan meel ku dhaganeyn, qalocin, iyo in aysan bololin.
- Ka raadi burburka aboorka iyo calaamadaha kale ee cayayaanka ama dooliga.

- Ka ilaali in barafka uusan ku badanin meelaha dumi kara.

Aasaasyada iyo Qolalka ka Hooseeyo Dhulka

- Baar aasaasyada in aysan lahayn calaamadaha hoos u degista, sida foocidda ama dhaqaaqa. Xirfadlayaal ha baadhaan dillaacyada ka wayn 1/8-inj ballaadhka.
- Ka hubi seeska dillaacyo yaryar ama daloolo halkaas oo wallada ama xayawaanka kale ay mari karaan. Jiilaalku waa marka ay raadiyaan gude diiran, markaa xidh irrid kasta oo ay ka soo gali karaan.

- Qoyaan iyo biyo soo dhaafa ka eeg qolalka dhulka ka hooseeyo iyo hulalka. Biyaha fadhiya ayaa noqon kara calaamad dareerin aan wanaagsaneyn, taasoo daciifin karta aasaaska.
- Tijaabi bamka biyaha dibadda u saara (sump pump) ka hor inta aan la gaarin xilli kasta oo qoyan. Ka fikir inaad kayd ahaan geliso bamamka biyaha dibadda u saara (sump pump) ee beetariga ku shaqeeya si aad uga hortagto quwadda oo tagta ama bamka ugu muhiimsan oo makaaniko ahaan shaqey weyda.

Dareemayaasha Qiiqa iyo Kaarboon Mono Ogsaydh

- Fiiri in dareemayaashu ay shaqaynayaan; ka beddel beetariyada ugu yaraan hal mar sannadkii.
- Beddel unugyada siddeedii sanno hal mar.



LIISKA DAYACTIRKA GURIGA



Albaabada iyo Daaqadaha

- Fiiri daaqadaha hawo qabaw oo soo gasha taasoo waxyeeli karta waxtarka kulaylintaada. Haddaanad lahayn daaqado laba lakab leh, ka saar muraayadaha oo ku rakib daaqadaha duufaanta si aad u hubiso in kulku gudaha ku haro qabawguna dibadda. Hab kale oo lagu yareeyo kharashka waa marka bac khafiif ah lagu wareejiyo daaqadda si ay uga ilaaliso kulku inuu baxo. Hubso inaad xaqijiso albaabadaada sidoo kale.

- Beddel waxyaabaha lagu cubo iyo sharootada ka soo fuqday meelaha qabowga ka soo galo.
- Ku xidh quful adag dhammaan albaabada dibadda, oo ay ku jirto albaabka u dhexeeya geeraashka iyo gurigaaga. Isticmaal saxan bir culus oo leh iskuruuyo saddex-inji ah iyo qufulada adag Darajada 1aad si aad u hesho badbaadinta ugu sarreeyso.

Biyogalinta

- Tubooyinka ku yaala rakada, hulalka hoose, qolalka ka hooseeyo dhulka, iyo halka u dhaw darbiyada dibadda waxay u nuglaan karaan barafka xad dhaafka ah. Qabawga ka celi tubooyinka qaawan ee biyaha qaada si aad uga badbaadisid in biyaha ku dhex jira fadhiistaan iyo in ay qarxaan. Ka fikir in aad qasabadaha dibadaha ku baddashid noocyada ka hortagga qabawga.
- Hubi kulayliyaha biyaha. Inta ugu badan kulayliyayaasha biyuhu waxay gaaraan 12 sano. Meelaha qoyan ee kabiska ama taangiga daxalaystay wuxuu astaan u noqon karaa dhibaato. Kulayliyayaasha biyaha waa in lagu geliyo dabaqa ugu hooseeya guriga inta badan ku yaalaan halka ku xigta dareerinta kabiska.

- Ku duub tubooyinka iyo qasabadaha dibadda shay ka celiya qabawga ama isticmaal daboolka agabka jaban.
- Ka eeg biyo ama duug hareeraha iyo hoosta qalabka biyaha iyo waxyaabaha la geliyay. Sannad kasta, hubi xukumayaasha xera biyaha ee dhamaan qalabka iyo tubada biyaha ee ugu wayn.
- Beddel tubooyinka biyaha mishiinka dhaqista saddex ilaa shan sano kasta.

Siistemyada Korontada iyo Makaanikada iyo Danabka

- Xirfadlayaal ha hubiyaan mukeefka iyo kulayliyahaaga. Ka fikir nadiifinta tubooyinka hawada in la nadiiyo filtaradana laga beddelo.
- Koronto yaqaan ha eego siistemkaaga korontada.
- Waxaad qalabka elektarooniga dareenka badan iyo qalabka kale ee la isticmaalo gelisaa meelaha laga qaato korantada nooca UL.
- Nadiifi tubada qallajiyaha dharka ee qaada hawada kulul iyo qoyaamiyaha (damper), iyo meesha ka hoosaysa qallajiyaha.

- Ogaaw meesha ay ku yaalaan xukumayaasha korontada, gaaska iyo biyaha. Waxaad qalabka lama-huraanka ah dhigataa halka u dhaw xukumayaasha gaaska iyo biyaha, waxaadna barta xubnaha qoyska sida loo damiyo danabka. Haddaad xidho gaaska, wakiil ka socda danabka gaaska dabiiciga ah waa inuu dib u furaa. Adiga ha isk dayin inaad tan samayso.
- Barafka ka nadiifi cabbiraha danabka iyo daaqadaha qolalka ka hooseeyo dhulka iyo daloolka laga saaro hawada kulul ee ka timaada qallajiyahaaga.

Dhul Simista, Meelaha Lagu Socdo iyo Illimada

- Xaaq caleemaha fadhiista dareerinta duufaanka hana furnadaan si aad isaga ilaaliso daadka biyaha ku soo fatahma jidadka iyo waxyeelada soo gaadha hantida qofka. Waxaad caleenta gelisaa weelka qashinka kibadda yaala si sax ah dib loogu isticmaalo.
- Geeduhu waa inay caafimaad qabaan kuna yaalaan masaafu ku habboon ammaanka guriga. Jar laamaha ka baxay dhinaca guriga si aad uga hortagto waxyeelada cayayaanka iyo qoyaanka. Xaaladaha barafka fadhiista waxay ku keen karaan laamaha inay jabaan oo waxyeelaan gurigaaga.
- Hubi in xashka geedaha iyo dhulku ay siddeed inji ka hooseeyaan dhinaca guriga.
- Jar kaynta soo gasha dariiqyada la maro.
- U fiirso sasaanka dareerinta biyaha duufaanka ka soo daga taagyada u dhaw gurigaaga, oo qor meelaha biyaha dheeraadka ahi ku kulmayaan.

- Sare u qaad guriga si biyuhu uga dareeriyaa aasaaska, masharaabtana ka fogeyaan guriga kuna toosiyaan siistemyada dareerinta duufaanka.
- Waxaad taagagga ku dhaw gurigaaga ka fiirisaa calaamadaha muujiya dhaqdhaqaaqa dhulka, sida carro guurka yar, dhaqaaqa xashka ama waliba geedaha qaloocon. La xidhiidh cilmiga farasamada dhulka ama injineerka dhismaha si uu u go'aamiyo darnaanta dhibtaada.
- Fiiri haddii ay dabacsan yahiiin meelaha gacmaha lagu qabsado jaranjarada, tiirarka jaranjarada iyo daboolada jaranjarada.
- Hagaaji meelaha lagu socdo ee qalqaloocday ama dildillaacay.
- Waxaad dhinaca lagu socdo ka nadiifisaa barafka soo dhaco iyo midka fadhiista, waxaadna adeegsataa milix, dhalaaliyaha barafka iyo/ama xaaqidda barafka si aad isaga ilaaliso in aan lagu dhaawacmin hantidaada.